

Maxkamadda Sare ee Koloraado

2 East 14th Avenue
Denver, CO 80203
(720) 626-5460

NATHAN B. COATS
MADAXA CADAALADDA

MAXKAMADDA SARE EE KOLORAADO XAFIISKA MADAXA CADAALADDA

Amarka La cusbooneysiisay ee La xiriira COVID-19 iyo Howlgalka Maxkamadaha Gobolka Kolorado

Xiliga Maarso 16 iyo 20, iyo Abriil 16, 2020, maadaama aan ahay Madaxa Cadaalada Maxkamada Sare Kolorado, waxaan soo saaray amaro la xiriira maamulka maxkamada gobolka inta lagu jiro cudurka safmarka COVID 19.

Iyada oo la tixgelinayo jaheynta isbadeleyso ee ka imaaneyso saraakiisha caafimaad iyo amarada fullinta la badelay oo dhammaan heerarka dowlada oo si tartiib ah u nasinayo xadeynada qaarkood ee usu imaanshaha iyo taabashada shaqsiga; waajibaadyada garsoorka oo bixinayo kulamada waqtiyeysan oo ku amrayo arimaha sharciga ee dadka gobolkaan; iyo ku dhaqanka dhaxgalka awoodahooda xukun sameynta dastuuriga ah oo maxkamada sare; waxaan hadeer u badelay amaradaas sida xigto:

Ilaa jaheyn dheeraad ah ee ka imaaneyso Madaxa Cadaalada, maxkamada gobolka way sii wadayaan inay ka shaqeeyaan si degdeg ku saleysan. Madaxa Garsoorka oo degmooyin kala duwan waxaa laga filanayaa sii wadida in laga dhigo dhammaan dadaalo macquul ah oo lagu fududeynayo shaqada oo ay sameeyeen shaqaalaha waaxda ee goobaha fog iyo yareynta taabashada shaqsiga. Dhammaadkaas, iyo fahamka in dacwadaha garsoorka qaar ay u baahan karaan muuqaalada shaqsiga, marwalboo macquul ah, dacwadaha garsoorka, oo aan laga eegin noocooda, waa inay sii wadaan in loo sameeyo si ka baxsan goobta.

Waxaa dheeraad waajibaadyada maxkamada gobolka si ay u siiyaan kulamo oo sameynta ganacsi sharci ah iyo illaalada xaquuqaha sharciga, oo waafaqsan shaqaalaha iyo illaha lagu heli karo sida waafaqsan sharuudahaas xaalada degdega ah, maxkamada gobolka waxay sii wadayaan sameynta badbaadada ah oo dhammaan ganacsiga sharciga ah, haddii muhiim tahay ama aysan aheyn. Wixii illaalada caafimaadka bulshada, badbaadada, iyo daryeelka, si kastaba, shaqooyinka garsoorka qaar waa in muhiim loo tixgeliyaa, xittaa inta lagu jiro masiibooyinka caafimaadka hadeer, iyo sidaas darteed shaqooyinka waa in mudnaanta laga siiyaa arimaha kale oo waa inaan dhammaantood lawada joojin, xittaa halka aanan lagu bixin karin si fogaansho ah. Arimahaan waxaa ku jiro:

1. Dacwadaha amarada illaalada rayidka oo ku meelgaarka ah iyo dhageysiyada amarada illaalada joogtada ah;

2. Dacwadaha amarada illaalada halista arimaha degdega ee ku meelgaarka ah iyo dhageysiyada amarada illaalada halista arimaha degdega;
3. Dambiga.P. Sharciga 5 tallointa dadka xabsiga ku jiro iyo diyaarinta hore ee damaanada;
4. Dhageysiga kala noqoshada ee cabashooyinka looga laabanayo tijaabinta ku lugleh eedeysanaha xabsiga ku jiro;
5. Dacwadaha muhiimka u ah illaalinta xaquuqaha dastuuriga ah oo eedeysanayaasha dambiihaha oo ay ku jiraan arimaha la xiriiro boonka iyo heshiiska qirashada oo shaqsiyaadka xabsiga ku jiro;
6. Dhageysiyada xabsi haynta oo dacwadaha dambiyada yar ee dhalinyarada;
7. Dhageysiyada hoyga ee dacwadaha ku tiirsanaanta iyo dayacaada ama dacwadaha kale ee dhalinyarada;
8. Dacwadaha balanta masuulka degdega iyo/ama shaqaalaha dacwada gaarka ah;
9. Dhageysiyada dhaqaayada oo lagu xadeynayo waqtiga waalidnimada iyo ka hortaga afduubka waalidka;
10. Dacwadaha caafimaadka maskaxda degdega; iyo
11. Iyo howlgalada kale ama arimaha ku jiro iqtiyaarka Madaxa Garsoorka waxaa loo arkaa inay muhoom u tahay ka hortaga halista dhibaataada dhaqaalaha dhow ama halis dhow oo caafimaadka, badbaadada, ama daryeelka ama shaqsi kale ama bulshada guud ahaan, kaas oo ku go'aansanayo Madaxa Garsoorka si dacwad-ba-dacwad ku saleysan kadib tixgelinta xaaladaha jiray oo dacwadaha gaarka ah.

Sababtoo ah xulashooyinka xeerbeegtida, ugi yaraan sida waafaqsan dhaqamada hadeer, weli la isuguma keeni karo si waafaqsan jaheynada caafimaadka bulshada jiray, ma jiro qof ay u yeereyso maxkamada gobolka oo la isugu keenayo adeega xeerbeegtida oo la bilaabay xili kasta ka hor Luuliyo 6, 2020, illaa ama illaa badelaad dheeraad ah oo amarkan ah. Iyada oo la tixgelinayo, si kastaba, xaquuqaha dastuuriga iyo qaanuunka ee maxkamad qaadida xeerbeegtida, iyo muhiimada lagu illaalinayo xaquuqahaas sida degdega oo suurto galka ah, madax walboo Garsoorka ah oo ku talinayo qaabka sameynta maxkamad qaadida xeerbeegtida xadidan oo waafaqsan jaheynada caafimaadka iyo amarada fullinta deegaanka ee la xiriiro usu imaatanka iyo taabashada shaqsi ah wuu raadin karaa ka dhaafida mamnuucidaan ku aadan usu imaatanka xulushooyinka xeerbeegtida ah.

Waxaa lagu sameeyay Denver, Kolorado maalintaan 5aad ee Maajo, 2020.



Nathan B. Coats

Madaxa Cadaaladda, Maxkamadda Sare ee Koloraado